## Macluumaad Taariikhiga ah ee Istaraatijiyadda

## Ka Qaybelinta Dadka Deegaanka Badbaadada Dhismaha

Macluumaadka taariikhiga ah ee lagu bixiyay dukumeentigani wuxu kaalmo ka geystay macluumaad ka bixinta ballanqaadyada loo soo jeediyay ka qaybgelinta dadka guryaha deggan ee guud ahaan magaalada badbaadada dhismaha. Ballanqaadayada istaraatijiyadda la soo jeediyay waxay khuseeyaan keliya dadwaynaha ku noolaha guryaha dabaqyada dhaadheer ee goluhu leeyahay kuwaas oo ka dheer 18 mitir ama todobo dabaq iyo wixii ka badan ah.

### Yaa ku nool guryaha dabaqyada dhaadheer ee goluhu leeyahay?

- Guud ahaan Bristol, waxa aanu ka masuul nahay maareynta iyo maamulka 56 dabaqyo dhaadheer ah, oo ay deggan yihiin 4,406 qoys.
- Dhismayaasha dabaqyada dhaadheer waxay ku kala firidhsan yihiin xaafado kala duwan oo noocyadooda dhismuhu waa kala duwan yihiin.
- Dadyoow kala duwan ayaa ku nool dhismayaashan, oo isugu jira dad soolani ah ama lammaanayaal illaa qoysas carruur haysta.
- Shan ka mid ah dhismayaashan ayaa hoy u ah dad duqoy ah.
- Sannadkii 2024, ku dhowaad 176 qof oo deggan guryahaas dhaadheer ayaa haystay heshiis ay ku sii kirayn karaan guryaha.
- Sannadkii 2024, macluumaadkii bulsho ee dadka deggana guryahaas waxa lagu soo koobay halkan hoose:

### Macluumaadka da'da

- 1.9% oo dadka ah ayaa u dhexeysay 16-24
- 30% oo dadka ah ayaa u dhexeysay 25-44
- 41.5% oo dadka ah ayaa u dhexeysay 45-64
- 15.1% oo dadka ah ayaa u dhexeysay 65-74
- 11.0% oo dadka ah ayaa u dhexeysay 75+
- 0.48% oo dadka ah ayaan da'dooda la aqoon

**Jinsiga**

- 48.9% dadka waa dheddig
- 49.9% dadka waa lab

**Qawmiyadda**

- 50.0% dadka waa Ingiriis Caddaan ah
- 39.1% dadka waxay ahaayeen Madoow, Eeshiyaan, ama qowmiyad kale oo laga tiro badan yahay
- 5.6% dadka waxay ahaayeen caddaanka kale
- 5.2% dadka qowmiyadooda lama yaqaan

**Naafonimada**

- 35.4% oo ka mid ah dadka deggan guryaha dabaqyada dhaadheer ayaa noo sheegay inay naafo yihiin

Nooca naafonimada ama awood la'aanta waxa lagu sheegay halkan hoose:

- 2.4% Maqalka ka naafo ah
- 3.5% Naafonimo dhanka waxbarashada ah
- 16.3% Xannuun Muddo Dheer ah
- 15.7% Dhibaato Caafimaadka Maskaxda ah
- 13.0% Socodka iyo Dhaqdhaqaaqa ka naafo
- 1.7% Aragga ka naafo ah
- 0.7% Kursi-curyaan isticmaalaya
- 7.2% Naafonimo Kale Qaba

**Fikradaha dadka guryaha deggan - waxa aad nooga sheegteen badbaadada guryihiina**

**Qanaacada Dadka Guryaha Deggan**

Muddadii Abriil 2023 illaa Maarso 2024, in ka badan 2000 oo dadka guryaha deggan ayaa ka qaybqaatay sahankeen ku qanacsanaanta adeegyada. 73% dadka soo jawaabay ee ku nool guryaha dabaqyada dhaadheer waxay sheegeen inay ku qanacsan yihiin in Golaha Deegaanka Bristol siiyeen guri aamin ah, marka la barbar dhigo 74% oo dadka magaalada guud ahaan deggan ah.

### Casharka laga bartay

Bishii Noofeembar, goluhu wuxu hawlo samatabixin degdeg ah ka sameeyay dhismaha Barton House. Dadka guriga degenaa waxa loo wareejiyay hoy ku meelgaar ah si dhismaha iyo qaab dhismeedkiisa loo qiimeeyo. Waqtigani wuxu ahaa mid ku adag dadka guriga Barton House degenaa kuwaas oo hadda ku laabtay guryahaoodii ka dib markii hawlihii sugista badqabka guriga la dhammaystiray ee uu goluhu xaqiijiyay in dhismuhu aamin yahay, dadkii degenaa guriga Barton House si joogto ah ayaanu ula xiriirnaa oo jawaabcelintoodiina waa la tixgeliyay.

Waxyaabaha muhiimka ah ee laga bartay guriga Barton House iyo dadka deggenaa waxa ka mid ah in Golahu:

- marka hore la xiriiro dadka guryaha deggan
- ka qaybgeliyo daneeyayaasha iyo wakiilada bulshada arrinta
- macluumaadka si daahfuran u siiyo dadka guryaha deggan, shaqaalaha iyo daneeyayaasha kale si ay u fahmaan waxa socda, sababta iyo xilliyada.

### Kuweeshaneerka Badbaadada Dhismaha

Muddadii u dhexaysay Febraayo iyo Maarso 2024, waxa aanu taleefan u dirnay dadka deggan guryaha dabaqyada dhaadheer oo ka dalbanay inay buuxiyaan kuweeshaneerka sahanka badbaadada dhismaha.

Waxa aanu dadka waydiinay:

- sida ay ku dareemayaan badbaadada dhismahooda
- waxa ay rabaan inay wax dheeraad ah ka ogaadaan
- sida ay jeclaan lahaayeen in loogala hadlo badbaadada dhismaha.

Wadar 817 qof ah ayaa ka soo jawaabay sahanka.

**Sahanka waxa aanu ka baranay in:**

- 81% dadka soo jawaabay waxay sheegeen inay yaqaanaan siday ku soo gudbin lahaayeen arrimaha khuseeya badbaadada dhismaha ama dabka hadii ay baqdin ka qabaan badbaadada gurigooda, 19% ayaan aqoon qaabka gudbinta.
- 85% dadka soo jawaabay waxay sheegeen inay guriga ka bixi karaan oo jaranjarada ka degi karaan haddii guriga dab ka kaco.
- 69% dadka guryaha deggan waxay sheegeen inay ka warqabaan shaqooyinka laga wado dhismahooda si loo adkeeyo badbaadadooda.
- Dayactirka dhismaha ayaa ahayd fallaadii ugu badnayn ee la xusay (10% dadka soo jawaabay ayaa xusay) ee la xiriirta hawlaha Golaha Deegaanka Bristol hayo. 7% ayaa xusay qiiq iyo dabka.
- Habka loogu doorbidka badnaa in lagu soo wada xiriiro wuxu ahaa waraq, waxana ku sii xigay iimayl waxana ku sii xigay farriin qoraal ah. 14% dadka sahanka ka soo jawaabay ayaa u baahday inay macluumaadka ku helaan isagoo qoraal waawayn lagu daabacay ama luuqad kale lagu turjumay. 5-ta luuqadood ee ugu sarreeyay ee la codsaday waxay ahaayeen Carabi, Soomaali, Boolish
- Dadka guryaha deggan waxay dareemayeen inay sida ugu fiican uga warqabaan badbaadada dabka (77%) iyo badbaadada korontada (62%) waxayna aad uga warqabin macdanaha birta iska caadiya (35%) iyo badbaadada biyaha (29%).
- Ku dhowaad 50% dadka soo jawaabay waxay sheegeen inay u baahan yihiin macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan badbaada gurigooda iyo dhismahooda.
- 8 ka mid ah 10-kii qof ee soo jawabay ayaa sheegay inay jeclaan lahaayeen inay macluumaadka ku saabsan badbaadada qaybaheeda kala duwan ku heaaln qoraal ahaan; kalabar dadku waxay doorbidee warqad inay ku helaan (50%) iyo 30% kalena waxay doorbideen iimayl.

- 35% ayaa dhahay waxaan jeclaan lahayn in aan ka qaybgalno kulanada magaalada ka dhaca ee ku saabsan badbaadada dhismayaasha dabaqyada dhaadheer.
- 27% dadka guryaha deggan ayaa jeclaan lahaa in ciidamada dab-damiska xaafadu soo booqdaan.
- 35% dadka soo jawaabay ayaa naafo ahaa.

Markii la waydiidyay sida loo horumarin karo badbaadada guryahooda 678 dadka guryaha deggan ayaa faallo reebay. Faallooyinka dadka guryaha deggani waxay muhiimad gaar ah u leeyihiin inaanu fahamno dhibaatooyinka ka jira guryo khaas ah iyo inaanu ogaano sida dadku ku dareemayaan xaaladda guryahooda. Khaasatan, dadku waxay muujiyeen in baahi loo qabo dayactir dheeraad ah iyo in goluhu hubiyo in dawanada digniinta dabka iyo qiiqa loo kordhiyo goobaha looga baahan yahay. Dadka guryaha deggan waxay sidoo kale rabeen in qiimeyno badbaado oo dheeraad ah la sameeyo si ay aamin ugu dareemaan guryahooda.

**Ka jawaabista baahiyahaaga**

Dhammaan dadka ka soo jawaabay ra'yi uruurinta sahanka badbaadada dhismaha way mahadsan yihiin.

Guud ahaan, natiijooyinka laga helay sahankii ra'yi uruurintu waxay muujinayaan in dadka badankoodu badbaado dareemayaan oo ay og yihiin khataraha la xirira ku noolaanshaha guri dabaqa, hase ahaatee in arrimaha badbaadada si wayn diiradda loo saaro macluumaadkan si fiican loo bixiyo waxay dadka ka caawin doontaa inay kalsooni ku dareemaan badqabka guryahooda iyo inay si fiican ugu diyaarsanaadaan wixii dhib ah ee soo kordha.

Jawaabcelintiina joogtada iyo casharada aanu ka baranay waxay naga caawiyeen inaanu diyaarino ballanqaadyada mudnaanaha istaraatijiyaddan. Waxa aanu hadda wadnaa in aanu dadka guryaha deggan kala tashano arrimahan si aanu u hubino inaanu si fiican u fahamsanahay baahiyaha khaaska ee dadka oo faahfaahsan.

Xilligan, inta lagu jiro 2024-25 waxa aanu sii wadi doonaa inaanu dadka deegaanka macluumaad dheeraad ah ka siin horumarinta wacyigooda ku aaddan khataraha dhismaha iyo sidii ay u soo gudbin lahaayeen haddii wax dhibaatooyin ah dhacaan. Tan waxa ka mid ah:

- diyaarinta xaashida xogta badbaadada dabka
- in si joogto ah loo xiriiro dadka deggan guryaha mudnaanta dheeriga ah leh
- bixinta xog xiriir oo waadax ah si loogu gudbiyo walaacyada badbaadada dhismaha
- websaydka golaha looga sameeyo bog u gaar ah dhisme kasta oo dabaq dheer ah
- in farriimaha qoraalka aad loogu adeegsado si dadka deegaanka loogu xasuusiyo booqashoyinka qiimeynta badbaada.

Fadlan ku laabo dukumeentiga talobixinta si aad noogu soo gudbiso aragtidaada ku aaddan ka qaybgelinta dadka guryaha deggan badbaadada dhismayaasha.